

In dugsi la doorto

Dhammaan carruurta Eskilstuna waxay marka ay lix sano jiryo noqdaan boos ka heleyaan mid ka mid ah fasallada xannaanada ee degmada.

Dugsiga canugga loo soo tuurayo wuxuu ku yaallaa agagaarka deegaanka canugga. Inta lagu jiro waqtiga dugsiga hoose-dhexe oo dhan, degmadu waxay canuggaaga dugsiga ugu haysaa boos xajjisan.

Inta canuggaagu uu dugsiga hoose-dhexe ku jiro waxaad had iyo jeerba xaq u leedahay in aad boos ka codsatid dugsi kale oo ay degmadu leedahay ama mid ka mid ah dugsiyada xurta ah. Haddii uu boos ka bannaanyahay dugsiga aad codsatay waa la qaadanayaa canugga.

Canuggaagu ma billaabayaa fasalka xannaanada iyo barbaarinta carruurta?

Waqtiga dugsiyada la doorto waa 1 Nofeembar – 15 Diseembar 2017. Waxaad doorasho ku sameyneysaa eskilstuna.se/skolval. Haddii aadan canuggaaga fasal xannaano boos uga doorin waxaa canugga lagu meeleynayaa dugsiga loo soo tuuray. Ogaw waa in labada waalid ay aqoonsiga elekteroonigga ah ku galaan adeegga elekteroonigga ah.

Boos ka codso guriga xilliga firaaqada

Booska canuggaaga ee dugsiga xannaanadu wuu joogsanayaa 30 Juun. Haddii uu canuggaagu inta xagaaga lagu jiro u baahanyahay xannaano carruureed waxaad boos ka codsan kartaa guriga xilliga firaaqada laga billaabo 1 Luuliyo haddii kale waxaad boos codsataa laga billaabo billaabashada dugsiga. Codsiga waxaad ku sameyneysaa eskilstuna.se/skolval

Sidan ayaa boosaska dugsiga loo qeybinayaa

Marka hore waxaa boosaska laga buuxinayaa carruurta aagga dugsiga hoos taga deggan. Mararka qaarkood waxay taasi ka dhigantahay in dugsiyada gebi ahaanba uu buuxsamayo iyo in carruurta dooneysa in ay dhigato oo dhan in aysan boos ka heleynin. Boosaska laga yaabo in ay soo haraan waxaa la qeybinayaa iyadoo laga duulayo:

- heerka u dhawaashada*
- walaallo mudnaan isku siin
- bakhtiyaa nasiib

Jawaabta dugsi isu qaadashada

Inta xilli dugsiyeedka guga lagu jiro jawaab ku aaddan in canuggaagu uu boos helay ayaa dugsi degmada ee aad codsatay kaaga imaaneyna. Haddii uu canuggaagu boos ka helo dugsi kale oo aan ahayn kii loo soo tuuray wuxuu canuggaagu mar walba xaq u leeyahay in uu u soo beddesho dugsi loo soo tuuray. Markaas eskilstuna.se/skolval ayaa codsi beddelasho ku sameyneysaa.

Haddii aad qabtid su'aalo dheeraad ah waxaad la xiriireysaa dugsi canuggaaga. Haddii aad caawimaad ugu baahantihin adeegga elekteroonigga ah waxaad e-mail u diri kartaa skolval@eskilstuna.se ama Eskilstuna toos uga wac taleefanka 016-710 10 00, dooro badhanka 2. Markaas ka dib door doorranka Dugsi doorasho.

Canuggaagu ma doonayaa in uu fasal muusiko dhigto?

Fasallada muusikadu waxay ka jiraan Dugsi Djurgård iyo Dugsi Stålfors. Codsiga muusikada waxaa 1 Nofeembar – 15 Diseembar lagu sameynayaa eskilstuna.se/skolval.

Imtixaan gelitaan oo ku aaddan fasalka muusikada

Carruurta codsata fasalka muusikada waxaa loogu yeerayaa imtixaan gelitaan. Imtixaanka ka dib wuxuu dugsi kuu soo sheegayaa haddii canugga loo qaatay fasalka. Haddii aan canuggaaga fasalka muusikada loo qaadan booskiisa wuu ka sii heysanayaa dugsi loo soo tuuray ama codsi gacan labaadka ah ayaa loo eegayaa.

In la doorto dugsi xur ah

Dugsiyada xurta ah waxaa ay leeyihiin foomamkooda codsiga, iyaga ayaana maamusha qaadashadooda. Si aanu hawlaha dugsiyada degmada u qorshayn karno mahad ayaanu ka haynaa haddii xitaa canugga codsada dugsi xur ah uu doorashada dugsi ku buuxiyo adeegga elekteroonigga ah. Habka sidan ah ayaa dugsi degmada lagu wargelinayaa.

Canuggaagu ma leeyahay luqad hooyo oo kale oo aan swiidhish ahayn?

Markaas wuxuu canuggaagu xaq u lahaan karaa in uu taageero afka hooyo ku helo fasal dugsi xannaanada ama in afka hooyo loogu dhigo dugsi hoose-dhexe. Bogga eskilstuna.se/modersmal waxaad ka akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku aaddan fursado ah in waqtiga dugsi lagu jiro afka hooyo lagu hor mariyo, halkaas ayaadna xitaa adeegga elekteroonigga ah codsi ku aaddan afhooyo dhigiddiisa kula sameyn kartaa.

** Heer dhawaansho waxaa loola jeedaa masaafada u dhexeysa guriga canugga (cinwaanka uu ku diwaan gashanyahay) iyo dugsi. Taasi waxay ka dhigantahay in haddii waaliddiinta dhashay ardayda A iyo B ay codsadaan isku hal dugsi oo ha canugne boos la siin karo, waxaa markaas mudnaanta la siinayaa canugga waddadiisa dugsiyada kale tagta ay ugu fogaatay.*